

IIB MA GALO
FAAFIN RASMI AH

الرسمية



رسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 2da Luulyo 1988, L. 7

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar wajiba — RUKUNKA: Sa-
nadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — djbadaeedana
waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1
Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. hajkii sadar iyo waxdi
ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la wey-
diistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta
waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda
Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

- SHARCI L. 14 ee 13 Juun. 1988, Oggolaansho Bog; 502
Heshiis Amaaheed oo dhex maray J.D.S.
iyo Bankiga Horumarinta Afrika
- SHARCI L. 15 ee 13 Juun. 1988, Oggolaansho » 503
Heshiis Amaaheed ee dhex maray J.D.S. iyo
Sanduuga Horumarinta Afrika, Mash.Is/ta
- SHARCI L. 16 ee 18 Juun. 1988, Sharciga Maa » 504
mulka Huteelada Dawladda.

WAKAALADDA MADBACADA QARANKA

Sharciga [ambar 16 ee 18ka Jun, 1988: Sharciga Maamulka Hoteellada Dawladda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Wasaaradda Warfaafinta, Hanuuninta Dadweynaha iyo Dalxiiska waxay la gelj kartaa Shirkado iyo Maalqabeenka Soomaaliga iyo kuwa Shisheeye heshiis faa'iido wadaag (Joint venture) oo ku saabsan Maamulka Hoteellada iyadoo la dhawrayo shuruudaha Sharciga Maalgelinta Shisheeye.

Qod. 2aad

Shaqaalaha Hoteellada waxaa laga dhigay Heshiistey, iyadoo hadda kaddib lagu dhaqj doono Sharciga [ambar 26 ee 5ta Luulyo 1984, kuna saabsan Shaqaalaha Warshadaha.

Qod. 3aad

Waxaa la buriyey Sharci kasta oo ka soo horjeeda Sharcigan ama aan la socon karin.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 18 Jun 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)